

Tallaalka cudurka rotafayruus

Cudurka rotafayruus

Rotafayruusku wuxuu sabab u yahay qiyaastii kalabar shubanka iyo matagga ku yimaada carruurta yaryar. Rotafayruuska si aad u fudud ayaa loo kala qaadaa. Qaabka inta badan loo qaadaa waa ilmaha oo gacanta afka geliya kadib markii uu taabtay wax rotafayruus leh. Fayruusku wuxuu soo raaca saxarada ka hor, kaddib iyo inta uu xanuunku ilmaha hayaba. Infakshanka rotafayruuska oo qofka ku dhaca qayb ahaan keliya ayuu qofka ka difaacayaa in uu mar kale ku dhaco ee kama wada difaacayo. Sidaas darteed ayuu cudurku carruurta intooda badan dhawr jeer ugu dhacaa inta ay yaryar yihiin. Nadaafadda gacmaha oo wacan ayaa yareyn karta is-qaadsiinta, laakiin si buuxda uma joojin karto.

Cudurka rotafayruusku wuxuu inta badan leeyahay calaamado ka xooggan cudurrada kale ee caloosha iyo xiidmaha ku dhaca. Carruurta badankeedu cudurka waxay ka bogsadaan iyadoo aaney cilladdo ku imaan, laakiin qaar baa u baahda in la daaweeyo kaddib marka ay fuuqbaxaan (dehydration). Haddii daaweynta lala habsaamo, wuxuu cudurku keeni karaa dhimasho, laakiin arrintaasi badanaa kama dhacdo qaybtan aynu dunida kaga nool nahay.

Ka hor intaan tallaalka rotafayruuska lagu darin barmaamijka tallaalka carruurta, ku dhowaad 2/3 dalool oo ah carruurta isbataallada loo geeyo matagga iyo shubanka ayaa waxaa taas sabab u ahaa cudurka rotafayruuska. Sanad kasta 700 ilaa 1100 ilmood oo qaba rotafayruus ayaa la jiihin jiray isbitaallada si loo daaweeyo. Intooda badan waxay ahaayeen kuwo ka yar 2 sano.

TALLAALKA ROTAFAYRUUS

Tallaalka rotafayruus waxaa ku jira rotafayruus nool oo la daciifiyay. Tallaalka fayruusku cudurka rotafayruusku kuma ridayo ilmo caafimaad qaba. Tallaalku waa mid aad u shaqaynaya wuxuuna ku dhowaad 100% difaacaa infakshanka rotafayruus oo halis ah.

Tallaalka rotafayruuska waxaa laga qaadanayaa afka wuxuuna leeyahay dhadhan macaan.

Tallaalka ku jira barmaamijka tallaalka carruurta waxa uu ka kooban yahay laba gojo. Goojada u horreysa waxa ilmaha la siinayaa ugu horreyn marka uu jiro 6 toddobaad, ugu dambeynna marka ilmuhu yahay 12 toddobaad. Goojada labaad waxa la siinayaa marka uu marayo 3 billood ama ugu dambeyn marka ilmuhu jiro 16 toddobaad..

Tallaalku waxa uu shaqaynayaa ugu yaraan 3 ilaa 4 sanno, waana in ku filan difaacidda carruurta ugu yaryar uguna nugul.

Ogeysii xarunta caafimaadka haddii ilmuhu xilli dhaw helay/qaatay dawooyin, qabo xaasaasiyad ama dhibbaatooyin caafimaad oo kale.

Waxaa la soo jeedinayaa in dib loo dhigo tallaalka haddii uu ilmuhu qabo xanuun infekshan ah oo ku-soobood ah kaas oo wata qandho ka sarreysa 38 °C ama xanuun infakshan caloosha iyo xiidmaha ah oo ku-soobood ah kuwaas oo wata shuban ama matag.

Waxyellooyinka danbe ee caadiga ah (bivirkninger):

Waxyellooyinka danbe ee ugu caadisan ee la xiriira tallaalka barmaamijka tallaalka carruurta (Rotarix) waa:

- Cuncun (irritabilitet), saxaro jilcan ayaa lagu arkaa ugu badnaan 1 ka mid ah 10-kii ilmood ee la tallaalo.
- Calool-xanuun, caloosha oo hawo gasho, falcelin maqaar ayaa lagu arkaa ugu badnaan 1 ka mid ah 100-kii ilmo ee la tallaalo.

Waxa jirta xaalad la og yahay oo aan inta badan dhicin oo ku timaadda xiidmaha carruurta yaryar (tarm-invaginasion). Qayb ka mid ah xiidmaha ayaa gala qaybta ka hooseysa. Norway waxa sannad kasta isbitaal la jiiifiyaa 35 ilaa 40 carruur ah oo ka yar 1 sanno oo qaba dhibkaas. Cilmi-baaris ayaa sheegaysa in tiradaasi in yar kordhi karto marka la hirgeliyo tallaalka rotafayruuska (ugu badnaan 1 jeer oo dheeraad ah marka 20 000 la tallaalo), gaar ahaan marka la tallaalo wixii ka weyn da' gaar ah. Taas daraadeed, waxa loo baahan yahay in goojada koowaad la siiyo ugu danbayn marka uu ilmuhu yahay 12 toddobaad, goojada labaadna ugu danbayn marka uu ilmuhu yahay 16 toddobaad.